

Power blackouts - using alternative fuel and electricity generation safely

Korontada oo tagta – isticmaalida shidaal kale iyo si nabad ah u curinta koronto

Somali

Marka koronto go'do, dadku mararka qaarkood waxay isticmaalaan shidaal kale ama curinta korontada si loogu sameeyo kulayl, qabow, qalajinta sarta, qalabka shaqeeya, karinta iwm.

Kaarboon monoksaydh waxaa laga hellaa qaac ka yimaada wax gubanaya sida kan ay sameeyaan shidaalka matoorka gaariga, cunta kariyaha, curiyayaasha korontada, faynuuska, iyo gaasaska kala duwan, iyo gubida dhuxusha iyo qoryaha.

Kaarboonka monoksaydhka ma muuqdo mana uro. Hadday ka bilaabato, garaashka ama karafaanku waxay dhalin kartaa jira degdeg ah, lumitaanka dareenka iyo dhimasho. Ka feker marabidaada iyo dadka.

Marna ha u isticmaalin waxyaallaha guriga banaankiisa loo isticmaalo guriga gudahiisa, qaybta hoose, garaashka, ama karafaan, ama banaanka daaqad furan u dhow. Qalabka la adeegsado sida koronta-curiyaha, cunta-dubaha, cunta kariyaha kaamka, ama batrool kale, gaaska LP-ga, gaaska dabiiciga ah, ama aallada gubta dhuxusha, waxaa loo isticmaali karaa keliya sida kan sameeyey cayimay.

Curiyaha-korontada

Dadka qaarkiis waxay isticmaalaan curiyaha korontada la qaadi karo oo kayd ah si loogaga shaqaysiiyo qalabka lagama maarmaanka ah sida firijika ama qalabka karinta.

In kastoo ay aad faaiido u leeyihiin, dhibta asaasi ah oo ay tahay in laga fogaado waa:

- Ku sumoobida kaarboon monoksaydhka gaariga ka soo baxaya
- Gilgilida korontada ama qabashada korontada,
- iyo dabka.

Dadka guriga jooga waxaa waajiba ku ah inay raacaan jahooyinka lagu sheegay curiyaha korontada si loo xaqiijiyo amaanka shaqada.

Gadashada curiyaha korontada

Koronto curiyaha rasmi ahaanta looga dhisay waa kan ugu haboon inuu siiyo koronto guriga.

Curiyaha korontadu wuxuu u baahan yahay in loo eego heerka uu u baahan yahay. Eeg qoraalka ka hadlaya nalaynta, qalabka, iyo aalladaha aad u baahan tahay inaad ku xirto si kani u shaqeeyo.

Haddii aalladaadu qaadato koronto ka badan inta curiyaha-korontadu soo saaro, taasi waxaa laga yaabaa inay damiso fuyuuska koronto curiyaha ama wax yeesho qalabka ku xiran.

Haddii curiyaha korontadu aanu soo saarin koronto ku filan dhamaan baahidaada, qorshay inaad u kala qaybqaybiso waqtiga shaqada qalabyada kala duwan.

Si amaana u isticmaalida koronto curiyaha

MARNA ha ku isticmaalin curiyaha-korontada la qaadqaado guriga-dhexdiisa. Taas waxaa ku jira garaashka dhexdiisa, halka gaariga la dhigo, qaybta guriga ka hoosaysa, meelaha lagu gurguurto, ama meel kale oo xiran ama qayb ahaan xiran, xataa hadduu leeyahay meel hawadu ka baxdo.

Albaabada furmaya ama daaqaduhu ma joojinayaan kaarboon monoksaydhka ka kacaya guriga.

Sidoo kale, xaqiiji inaad dhigto koronto-curiyaha meel ka fog daaqadaha, albaabada iyo meelaha hawadu ka baxdo oo u ogolaan kara in kaarboon monoksaydka ka baxo.

Waa fikrad fiican inaad ku rakibto gurigaaga batteri ku shaqeeya alaarmiga kaarboon monoksaydh oo leh batteri kayd ah.

Haddii kaarboon monoksaydh ka yimid koronto curiye galo gurigaaga oo kugu keeno dhib caafimaad alaarmiga ayaa qaylin doona. Hubi batteriga mar walba bedelna marka loo baahan yahay.

Ka fogaanshaha in korontadu ku qabsato

- Qalaji koronto-curiyaha hana ku isticmaalin roobka iyo hawada qoyan.
- Si looga xafido koronto-curiyaha qoyaanka, kaga shaqaysii meel qalalan hooso ama dabool leh sida tarpaulin tigimo kor u hayaan.
- Haddii gacmahaagu qoyan yihiin, qalaji inta aadan taaban koronto-curiyaha.

Shidaal ku shubida koronto-curiyaha

- Xaqiiji in koronto curiyuhu uu dansan yahay oo qabow yahay ka hor intaan shidaal lagu shubin. Bartoolka injiin kulul dushiisa lagu daadiyaa qarax ayuu keeni karaa.
- Ku kaydi batroolka meel ka fog halka la seexdo, meel xiran ama xafidan.
- Ha dhigin wax shidaal ah wax gubanaya oo shidaal ku shaqeeya (sida biyaha gaaska dabiiciga ah garaashka dhexdiisa).

Isticmaalida qalabka adeega ku xiran curiyaha korontada

- Ku xir qalabka adeega koronta-curiyaha. Haddii kale, isticmaal xarig koronto oo xoog leh gaarayana banaanka kaas oo leh (watts ama amps) awood u dhiganta waxyaallaha lagu xirayo.
- Hubi in xariga oo dhami yahay mid aan lahayn googo' ama duug ah meesha la gelinayaana leedahay saddexdii god khaasatan kan dhulka.
- **MARNA** ha isku deyin inaad guriga ku daarto fiilooyin adoo gelinaya curiyaha korontada derbiga mid derbiga banaankiisa ah, isticmaal falka loo yaqaan "dibad ka quudinta" (back feeding). Falkaani waa mid aad khatar u ah oo keeni kara in koronto ku qabsato qofka ka shaqaynaya tas-hiilaadka iyo deriska ay koronto siiso isla tas-hiilaadka kala-gudbiyaha korontada (transformer). Waxay kaloo isaga gudubtaa aalladaha amaanka korontada ee guriga ku dhisan.

Waxyaallaha lagaga hortago ku sumowga kaarboon monoksaydh

- Marna ha isticmaalin gaas ama oofan si aad guriga ugu kulayso.
- Marna ha isticmaalin dhuxusha dubida, hibachi, faynuus, ama kan cuntada lagu kariyo oo la qaadi karo guriga dhexdiisa, teendhada ama karafaan.
- Marna ha ku shaqayn koronto curiye, biyaha xooga ku dhaca, wax kasta oo shidaal ku shaqeeya dhulka hoose, garaash, oo meel kale oo xiran, xataa haddii albaabada furan yihiin, haddii aan qalabku si fiican u xirnayn meel wax ka baxaana loo samayn.
- Ka ilaali meelaha wax ka baxaan saxarada ama waxyaallaha duulduulaya, khaasatan marka hawadu xoog leedahay, maadaama saxaradaasi xiri karaan meelaha hawadu ka sii gelayso.
- Marna ha ku shaqayn matoorka gaariga, koronto curiye, biyaha xooga ku dhaca, wax kasta oo shidaal ku shaqeeya dhulka hoose, garaash, ama meel kale oo xiran, xataa haddii albaabada furan yihiin, haddii aan qalabku si fiican u xirnayn meel wax ka baxaana loo samayn.
- Marna ha ka tegin matoorka shaqaynaya gaari yaalla meel xiran ama qayb ahaan xiran sida garaashka.
- Haddii aad dareento xannuun, warwareer, ama daciifnimo qaado hawo cusub isla markiiba – **ha daahin**.
- **Haddii aad ka shakisan tahay in kaarboon monoksaydh ku galay raadso talo caafimaad isla markiiba.**

Macluumaad intaas ka badan

Talo caafimaad ama neefsashada kaarboon monoksaydh la xiriir dhakhtarkaaga.

Macluumaad caafimaad oo guud oo ku saabsan kaarboon monoksaydh la xiriir unuga Caafimaadka Bay'ada (Environmental Health Unit) oo Wasaarada Adeega Aadamiga tel 1300 761 874.

Macluumaad ku saabsan si amaana u isticmaalida gaaska ama korontada la xiriir Energy safe Victoria tel (03) 9203 9700 ama bogga websaytkooda oo ah www.esv.vic.gov.au

Gaas daadanaya ama xaalladaha degdegta ah wac 132 771

Koobiyaal siyaada ah oo xaashidaan waxaad kala soo bixi kartaa bogga websaytka oo ah : www.health.vic.gov.au/environment/emergency_mgmnt/index.htm

Tixraac (References)

Preventing Carbon Monoxide Poisoning After an Emergency (2006) Centre for Disease Control & Prevention, Department of Health & Human Services.

Public Health Fact Sheet – Safe Use of Generators in Blackouts (2005) Queensland Health, Queensland Government.